

Xeerka Taleefanka Gacanta ee Como Park Senior High School



Dugsiga Como Park Senior High School ahaan, waxaan ku taageernaa ardaydeena isticmaalka tikniyoolajiyadda ee la xiriirta nolosha dhabta ah iyo gaar ahaan dhanka waxbarashada. **Hayeeshee ma oggolaaneyno in taleefannada gacanta lagu dhex isticmaalo dugsiga inta lagu jiro wakhtiga waxbarashada inta u dhaxaysa saacadaha 8:30 ilaa 3:00 pm.**

Amarrada ku saabsan isticmaalka taleefanka gacanta:

1. Macallinka ayaa mas'uul ka ah waxbarista iyo ammaanka meelaha ay hoggaamiyaan.
 - a. In taleefannada laga fogeeyo goobaha waxbarashada waxay ka caawisaa ardayda inay diiradda saaraan waxbarashada. Qof macallin ah ayaa marka hore tilmaamid afka ah siinayo ardayga si uu u xareeyo taleefanka.
 - b. Haddii ardaygu uusan raacin codsigan tixgelinta leh **ama** taleefankooda uu mar kale fasalka caqabad ku noqdo, macallinka ayaa ardayga ka codsan doona inuu taleefanka ku wareejiyo si uu u geliyo goob aamin ah ilaa dhammaadka fasalka.
 - c. Haddii uusan ardaygu raacin codsiyada shaqaalaha iskoolka **ama aan** taleefankooda lagu xareyn goob aamin ah oo ka tirsan gudaha fasalka, macallinka ayaa codsan doona faragelinta shaqaalaha edbinta. Foomka gudbinta edbinta ayaa xafiiska laga buuxin doonaa, ka dibna taleefanka waxaa loo dhiibi doonaa shaqaalaha edbinta ama Maareeyaha iskoolka inta ka harsan maalinta. Qoyska waa lala xiriiri doonaa.
 - d. Haddii adeegsiga taleefanka gacanta ee ardaygu uu noqdo mid soo noqnoqda, ama ay si joogto ah u diidaan codsiyada macquulka ah ee macallinka, kulan qoys ayaa loo baahan doonaa oo heshiis taleefan ayaa meel la isla wada dhigi doonaa.
2. In la waco taleefanka ama la qabto taleefan soo dhacay waxaa laga oggol yahay oo keliya gudaha xafiiska iskoolka iyadoo fasax laga haysto macallin/shaqaale. Waxaa kaloo la oggol yahay xilliga lagu jiro qadada/fasallada loo kala socdo. Ardaydu waa inaysan qaban ama wicin taleefanka/fiidiyowga ee aaladaha inta lagu jiro wakhtiga fasalka.
 - a. Ardayda qabata ama wacdo taleefanka ama fiidiyowga ee aaladaha inta lagu jiro fasalka waxaa loo gudbin doonaa shaqaalaha edbinta ee soo farageliyo habdhaqanka ardayga. Qoysaska waa lala xiriiri doonaa.
 - b. Haddii ardaygu sii wado inuu waco ama qabto taleefan/aalad inta lagu jiro fasalka, kulan qoys ayaa loo baahan doonaa oo heshiis taleefan ayaa meel la isla wada dhigi doonaa.

Maxay tahay sababta aynu u sii adkeyneyno amarradeenna taleefannada gacanta ?

1. **Si qofku u koro qof ahaan wuxuu u baahan yahay isdhexgal dhab ah oo bini'aadam** lala shaqeeyo. Waxaynu aaminsannahay inay muhiim yihiin barashada xirfadaha wada xiriirka iyo kuwa wada shaqeynta ee labada qof dhex maro. Mid ka mid ah xirfadaha ugu muhiimsan ee ay ardaydeennu ku baran doonaan dugsiga Como Park Senior waa sida dadka loola socdo oo si fiican loola shaqeeyo, fool-ka-fool, iyagoo ah dad kala duwan.
2. **Aaladahan korontada ku shaqeeyo ayaa noqday kuwo carqaladeynaya jewiga fasalka.** Dhawaqa ogeysiisyada taleefanka gacanta ayaa carqaladeynaya ardayga iyo fasalka labadaba. Waxaan rabnaa

in ardaydu diiradda saaraan waxbarashada, ee ma ahan in ay ku jeestaan cidda soo wacaysa ama farriinta soo dirtay.

3. **Aaladahaan waa la xadaa.** Nasiib darro, inkastoo ay ardaydeena Como Park fiican yihiin, misana taleefannada waa la xadaa. Waa aalado soo jiidasho leh. Inkastoo aan isku dayno inaan ka caawino ardayda xallinta dhibaataada, misana iskoolka mas'uul kama aha qalabka elektarooniga ah ee lumay ama la xaday. Fasal walba wuxuu lahaan doonaa aag aamin ah oo quful leh kaasoo lagu ilaaliyo taleefannada gacanta inta lagu jiro wakhtiga waxbarashada haddii ardaygu uusan haysan meel aamin ah oo uu gelin karo taleefankiisa inta lagu jiro fasalka.
4. **Ardaydu uma baahna taleefannada.** Arday walba oo ka tirsan Como Park waxaa la siiyaa iPad loogu talagalay inuu u isticmaalo tacliinta. Waxaan kaa codsaneynaa inaad dib u eegto amarradaan oo sidoo kalena aad nagu caawisid inaad ardaygaaga farriinta qoran u soo dirin ama aadan la soo xiriirin inta lagu jiro saacadaha iskoolka. Haddii ay dhacdo xaalad degdeg ah, fadlan ka wac xafiiska weyn 651-293-8800 oo waxaynu farriin u diri doonnaa ardaygaaga sida ugu dhakhsaha badan.